



City of Seattle

Maamulka Shaqaalaha Seattle

Kimberly Loving, Agaasime

Sebteembar 29, 2023

Ujeedo: Samee Isbedelada Dheefahaaga 2024 Jimcaha, Oktoobar 20

Shaqaalaha Magaalada ee Qaaliga ah:

Ilaalinta caafimaadkaaga iyo fayo-qabkaaga waa muhiim; hadda in ka badan sidii hore. Magaaladu waxay siisaa shaqaalaha iyo qoysaska doorashooyin dheefo oo kala duwan oo taageera caafimaadka iyo amaanka maaliyadeed. Diiwaangelinta Furan waa wakhti lagu qiimeeyo baahiyahaaga 2024 oo lagu sameeyo wax ka beddelka xulashooyinka dheefta. Diiwaangelinta furan waxay bilaabataa 8:00 subaxnimo Isniinta, Oktoobar 2, waxayna dhammaanaysaa 5:00 galabnimo Jimcaha, Oktoobar 20, 2023.

Ma jiro wax talaabo ah oo loo baahanyahay si loo sii wado dheefahaaga hadda 2024 ilaa aad rabto inaad isdiiwaangeliso ama dib-u-diiwaangeliso Koontada Kharashka Garaynta Dabacsan tahay (Flexible Spending Account, FSA). **Ka jaritaanka mushaharka qorshaha caafimaadka ma kordhayaan 2024.**

Tixgelintaaada Isu-adeegitaanka Shaqaalaha (ESS):

- ☐ **Isu diwaangali/dib isugu diwaangali FSA.** Si aad meel u dhigto lacagta cashuurta kahor 2024 Daryeelka Caafimaadka ama Daryeelka Ku tiirsanaanta (Daycare) FSA, waa inaad **dib isaga diiwaangeliso** inta lagu jiro Diiwaangelinta Furan ee ESS. Doorashadaada FSA hadda kama dhacayso hal sano ilaa sanadka xiga. Macluumaadka ku saabsan qorshaha, aad bit.ly/mostFSA.
- ☐ **Badel dheefahaaga.** Samee doorashooyin qorshe dheefo oo kala duwan ama ku dar ama iska saar kuwa ku tiirsan.
- ☐ **Cusboonaysii dadka ka faa'iidaystayaasha ah.** Dib u eeg ka faa'iideystayaasha caymiska Noloshu iyo AD&D ee ESS.

Eeg bogga xiga isbeelada qorshaha 2024 iyo tilmaamaha diiwaangelinta. Wixii faahfaahin dheeraad, aad ku **Biiritaanka Furan** bit.ly/benhome1.

Taariikhda kama dambaysta ah ee Ogaysiiska: Si aad u samaysato FSA ama u samayso isbeddel dheefta 2024, waa inaad sidaas samaysaa ugu dambeyn **5:00 galabnimo Jimcaha, Oktoobar 20** iyada oo loo adeegsanayo Adeegga Iska wax uq absiga Shaqaalaha.

Qor doorashooyinkaaga dheefaha 2024: Soo daabaco ama keydso sawirka shaashadaada ee **“Summary of Open Enrollment Elections”** ee Adeega Iska Wax u Qabsashada ee Shaqaalaha oo barbar dhig bayaanka dheefaha 2024 ee aad heli doonto Janaayo. Wixii su'aalo ah, fadlan la xiriir wakiilka dheefaha ee waaxdaada (bit.ly/benhome1).

Seattle Human Resources

Seattle Municipal Tower, 700 5th Avenue Suite 5500, PO Box 34028, Seattle, WA 98124-4028
(206) 684-7999 □ TTY: 7-1-1 Fakis: (206) 684-4157 □ Employment Website: www.seattle.gov/jobs
Loo shaqeeyaha fursad shaqo oo siman. Guryaha loogu talagalay dadka naafada ah ayaa la bixiyaa marka la codsado.

Si daacadnimo leh.

A handwritten signature in black ink, appearing to read 'Renee Freiboth', written in a cursive style.

Renee Freiboth

Maareeyaha Dheefaha

Qorshaha Isbeddelada Dhammaan Shaqaalaha*, oo dhaqangalaya Janaayo 1, 2024

Koontada Kharash Garaynta Dabacsan (Flexible Spending Accounts)

Health FSA	Kordhinta wax ku taritaanka sanadeedka ugu badnaan oo ahaa \$2,850 ilaa \$3,050.
-------------------	--

Qorshaha Isbeddelada Inta Badan Shaqaalaha*, oo dhaqangalaya Janaayo 1, 2024

Qorshaha Ka Hortag ahaaneed iyo Dhaqan ahaaneed ee Aetna

Caymiska Gaariga Ambalaasta	Ka saaritaanka lacagta la jaro caymiska ambalaasta
--	--

Qorshaha Dhaqan ahaaneed ee Aetna

Lacagaha la jaro	Kordhinta lacagaha la jaro ee shabakada dhexdeeda ah \$50 ilaa \$450 qofkiiba; \$1,350 qoyska.
Wadarta Lacagta ugu Badan ee Sanadlaha ee Jeebka laga Bixiyo	Kordhinta lacagaha jeebka laga bixiyo ee ugu badan ee shabakada ka baxsab \$50 ilaa \$1,450 qofkiiba; \$4,350 qoyska.
Adeegyada Ka Hortag ahaaneed iyo Fayo-qabka	Ku daritaanka dheefaha daryeelka ka Hortag ahaaneed. Shabakada dhexdeeda: 100%. Cayminta ka baxsan shabakada: wadaagista kharashka ayaa lagu dabaqi karaa.
Daawada Ka Hortag ahaaneed	Kordhinta caymiska ka hortagga daawada ilaa 100%, oo ay ku jiraan qaar ka hortagga uur-qaadidda, daawooyi nka yareeya kolestoroolka, iyo daawooyinka ka hortagga HIV. Liistada daawada oo buuxa 2023 bit.ly/3PBtdkS .

Daawada Ka Hortag ahaaneed ee Aetna

Adeegyada Ka Hortag ahaaneed iyo Fayo-qabka	Kordhinta dheefaha daryeelka ka Hortag ahaaneed. Shabakada dhexdeeda: 100%. Cayminta ka baxsan shabakada: wadaagista kharashka ayaa lagu dabaqi karaa.
Daawada Ka Hortag ahaaneed	Kordhinta caymiska ka hortagga daawada ilaa 100%, oo ay ku jiraan qaar ka hortagga uur-qaadidda, daawooyi nka yareeya kolestoroolka, iyo daawooyinka ka hortagga HIV. Liistada daawada oo buuxa 2023 bit.ly/3PBtdkS .

* Ka eeg fursada ku Biiritaanka Furan bit.ly/benhome1 wixii faahfaahin dheeraad ah.

Iska diwaangeli Khadka tooska ah

Fadlan ha sugin ilaa maalinta u dambaysa si aad ugu samayso isbeddeladaada khadka tooska ah.

<i>Kumbuyuutarka guriga ama Magaalada</i>	ess.seattle.gov	Xulo “Login to ESS”	Kadib markaad gasho, dooro “Open Enrollment” ee hoos timaada <i>Dheefaha</i>
--	---	---------------------	---